JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| Sannadkii 11aad | Cadad Gaar ah | Tariikhda Daabacada 16/07/2022 |
|---|---|---|



# XEERKA KA HORTAGGA IYO XAKAMAYNTA KA GANACSIGA TAHRIIBINTA DADKA
# XEER LR.101/2021


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com



Sannadka 2022



Lama iibin karo
Not for sale

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-879/062021** **Taar: 27/06/2022**

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Ka-hortagga iyo Xakamaynta Ka-ganacsiga Tahriibinta Dadka, Xeer Lr. 101/2021**

**Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qodobbada 38aad, 76aad iyo 77aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-3/935/2022, ee ku taariikhaysan 21/06/2022, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Ka-hortagga iyo Xakamaynta Ka-ganacsiga Tahriibinta Dadka;
Xeer Lr. 101/2021

**Waxaan soo-saaray;**

**Dhaqan-galka Xeerka Ka-hortagga iyo Xakamaynta Ka-ganacsiga Tahriibinta Dadka; Xeer Lr.101/2021.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND President

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Ref: GW/KF-03/935/2022 Date: 19/06/2022

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Ka Hortagga iyo Xakamaynta Ka Ganacsiga Tahriibinta Dadka Xeer Lr. 101/2021**

## GOLAHA WAKIILADU

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobada, 19aad ,24aad, 27aad, 35aad, 38aad, 61aad, 76aad, 77aad, iyo 78aad ee Dastuurka Qaranka JSL |
| Markuu Arkay: - | In fal-dambiyeedyada kaganacsiga iyo tahriibinta dadku ay xadgudub culus ku yihiin xuquuqaha ku cad Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliland iyo xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda Aadamaha. |
| Markuu Arkay: - | In Xeerka Ciqaabta Guud iyo xeerarka kale ee khuseeyaa aanay ku filnayn la dagaalanka kaganacsiga dadka iyo tahriibinta muhaajiriinta, sidaa daraadeedna ay lagama maarmaan tahay in sida ugu habboon dembi looga dhigo ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta dadka, loona dejiyo ciqaabta ku habboon, isla markaana mudnaanta la siiyo baadhista iyo dacwad oogidda, si wax looga qabto dadka ku kaca falalka tahriibinta iyo kaganacsiga dadka, loona horkeeno caddaalada. |
| Markuu Yaqiinsaday: - | In tallaabooyinka wax lagaga qabanayo falalka ka ganacsiga iyo tahriibinta dadku ay u baahan yihiin iskaashi iyo wadashaqayn heer qaran ah oo dhex mara hay'adaha dawladda iyo qaybaha kala duwan ee bulshada. |
| Markuu Arkay: - | In ay muhiim tahay in ilaalin habboon, taageero, ilaalin gaar ah, daryeel iyo kaalmo la siiyo dhibbaneyaasha iyo dadka nugul iyada oo la tixgalinayo da'dooda, jinsiga ay yihiin iyo baahida gaarka ah ee ay qabaan. |
| Markuu u Codeeyay:- | 05 June 2022 Wax ka badalka iyo Kaabista Golaha Guurtida JSL u soo soo sameysay Xeerka, isla markaana |

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Go'aanka Ansixinta Ka-Hortaga iyo Xakamaynta ka-Ganacsiga Tahriibinta Dadka **Xeer Lr. 101/2021** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **26/01/2022** kalfadhigii **2aad** fadhigiisi **19aad.** |
| Markuu Arkay: | In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameeyeen kuna ansixiyeen kow afartan **(41)** cod **Xeerka Ka-Hortagga iyo xakamaynta Ka- Ganacsiga** Tahribinta Dadka, Xeer Lr. 95/2021, kuna taariikhaysnaa 21/02/2022 |

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah **35 Cod** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Ka Hortagga iyo Xakamaynta ka Ganacsiga Tahriibinta Dadka (Xeer Lr. 101/2021).**

ALLAA MAHAD LEH

| | |
|---|---|
| Cabdirisaaq Siciid Ayaanle | Cabdirisaaq Khaliif Axmed |
| Xoghayaha Guud Ee Golaha Wakiilada | Guddoomiyaha Golaha Wakiilada |

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADA SOMALILAND

## Tusmada Xeerka

QAYBTA 1AAD QODOBO GUUD....5
Qodobka 1aad....5
Magaca Xeerka....5
Qodobka 2aad....5
Eray-bixin....5
Qodobka 3aad....6
Ujeeddooyinka Xeerka....6
Qodobka 4aad....6
Xadka dabbaqaadda Xeerka....6
Qodobka 5aad....7
Dabbaqaada ka baxsan xad-dhuleedka Somaliland....7
Qodobka 6aad....7
Danbiyada Kaganacsiga Dadka....7
Qodobka 7aad....7
Gacan siinta ama Gargaaridda Kaganacsiga Dadka....7
Qodobka 8aad....8
Xaaladaha Gaarka ah ee Culaysinta Ciqaabta....8
Qodobka 9aad....8
Danbiyada Tahriibinta Dadka....8
Qodobka 10aad....8
Xaaladaha Gaarka ah ee Culaysinta Ciqaabta....8
Qodobka 11aad....9
Caawinta iyo Gacan siinta Tahriibinta Dadka....9
Qodobka 12aad....9
Danbiyada Wadaha Gaadiidka Tahriibeyaasha....9
Qodobka 13aad....9
Danbiyada La'Xidhiidha Baasaaboorrada iyo Aqoonsiyada....9
Qodobka 14aad....10
Adeegyada Maaliyadeed ee La'xidhiidha Fal-danbiyeedyada Xeerkan....10
Qodobka 15aad....10



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Qodobka 16aad ........ 10
La wareegidda Hantida Fal-danbiyeedka ........ 10
Qodobka 17aad ........ 10
Burburinta iyo Is hortaagga Caddaymaha ........ 10
Qodobka 18aad ........ 11
Ka baaqsashada Sheegista Xogta ........ 11
Qodobka 19aad ........ 11
Danbiga ay Gasho Hay'ad Shakhsiyad Qaanuuni ah lihi ........ 11
Qodobka 20aad ........ 11
Dambi La'aanta Dhibbanaha ........ 11
Qodobka 21aad ........ 11
Magdhawga iyo Cawil-celinta ........ 11
Qodobka 22aad ........ 12
Taakuleynta Dhibbaneyaasha ........ 12
Qodobka 23aad ........ 12
Dib-u-celinta Dhibbaneyaasha Ajaanibka ah ........ 12
Qodobka 24aad ........ 13
Dib u soo Celinta Dhibbanayaasha u dhashay Somaliland ........ 13
Qodobka 25aad ........ 13
Macluumaadka Dhibaneyaasha ........ 13
Qodobka 26aad ........ 13
Ilaalinta Guud ee Dhibbaneyaasha iyo Markhaatiyada ........ 13
Qodobka 27aad ........ 14
Dhibbaneyaasha iyo Markhaatiyada Carruurta Ah ........ 14
Qodobka 28aad ........ 14
Muddada Oogista Danbiyada Kaganacsiga iyo Tahriibinta Dadka ........ 14
Qodobka 29aad ........ 14
Xuquuqda eedaysanaha/eedaysanayaasha. ........ 14
Qodobka 30aad ........ 15
Hagayaal iyo xeer-nidaamiyayaal ........ 15
Qodobka 31aad ........ 15
Tafsiir ........ 15

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Qodobka 32aad ........ 15
Nasakhaad ........ 15
Qodobka 33aad ........ 15
Kaabis iyo Wax-ka-beddel ........ 15
Qodobka 34aad ........ 16
Dhaqan-galka ........ 16



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## GOLAHA WAKIILADU

**Markuu Arkay: -** In fal-dambiyeedyada kaganacsiga iyo tahriibinta dadku ay xadgudub culus ku yihiin xuquuqaha ku cad Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliland iyo xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda Aadamaha.

**Markuu Arkay: -** In Xeerka Ciqaabta Guud iyo xeerarka kale ee khuseeyaa aanay ku filnayn la dagaalanka kaganacsiga dadka iyo tahriibinta muhaajiriinta, sidaa daraadeedna ay lagama maarmaan tahay in sida ugu habboon dembi looga dhigo ka ganacsiga dadka iyo tahriibinta dadka, loona dejiyo ciqaabta ku habboon, isla markaana mudnaanta la siiyo baadhista iyo dacwad oogidda, si wax looga qabto dadka ku kaca falalka tahriibinta iyo kaganacsiga dadka, loona horkeeno caddaalada.

**Markuu Yaqiinsaday: -** In tallaabooyinka wax lagaga qabanayo falalka ka ganacsiga iyo tahriibinta dadku ay u baahan yihiin iskaashi iyo wadashaqayn heer qaran ah oo dhex mara hay'adaha dawladda iyo qaybaha kala duwan ee bulshada.

**Markuu Arkay: -** In ay muhiim tahay in ilaalin habboon, taageero, ilaalin gaar ah, daryeel iyo kaalmo la siiyo dhibbaneyaasha iyo dadka nugul iyada oo la tixgalinayo da'dooda, jinsiga ay yihiin iyo baahida gaarka ah ee ay qabaan.

**Markuu u Codeeyay: -** **05 June 2022** Wax ka badalka iyo Kaabista Golaha Guurtida JSL u soo soo sameysay Xeerka, isla markaana

## WUXUU ANSIXIYAY XEERKAN

Xeerka Kahortagga iyo Xakamaynta Kaganacsiga Tahriibinta Dadka.
Xeer **Lr. 101/2022.**

## QAYBTA 1AAD QODOBO GUUD

### Qodobka 1aad

### Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Kahortagga iyo Xakamaynta Kaganacsiga Tahriibinta Dadka, Xeer Lr. 101/2021.

### Qodobka 2aad

### Eray-bixin

Haddaan Xeerkan si kale loogu sheegin, ereyadan hoos ku qoran waxa loola jeedaa: -

**Ku tagrifal xaalad nuglaansho: -** waxa loola jeedaa ka faa'iideysiga nuglaanshaha qof aaminsan in aanu haysan dariiq kale oo aan ahayn in uu fuliyo hawsha ama waxa laga dalbay, balse aan ku koobnayn ka faa'iideysiga nuglaanshaha ka dhasha in qof uu si sharci-darro ah ama isaga oo aan wadan Baasaaboor dalka soo galay ama qaba xanuun jidheed, maskaxeed, naafo ah, uur leh ama da'diisu yar tahay oo awooddiisa go'aan qaadashadu aanay taam ahayn.

**Tahriibinta dadka: -** Waxa loola jeedaa fal kasta oo dadka loo soo galiyo ama looga saaro ama looga gudbiyo xuduudaha dalka JSL si aan sharci ahayn oo aan waafaqsanayn Xeerka Socdaalka (Xeer lr 72/95) iyo qodobada Xeerkan

**Ka ganacsiga dadka: -** Waxa loola jeedaa kushaqaysiga, ku khasbidda lacag madax-furasho ah, adoonsiga, kaganacsiga jidhka (exploitation of the prostitution for others) iyo ka saarista xubnaha jidhka ee qofka.

**Ka ganacsade dad (Maggafe): -** Waxa loola jeedaa qofka safriya qofkale si khasab ama khiyaamo ah, si uu uga helo ama cid kale uga hesho faa'iido dhaqaale ama madax-furasho.

**Tahriibe: -** Waxa loola jeedaa qof kasta oo muwaadina sifo aan sharci ahayna dalka kaga baxay iyada oo ujeeddadu tahay tahriib ama ajaaniba oo sifo aan sharci ahayn ku soo galay dalka iyada oo ujeedadiisu tahay tahriib, inuu ka sii gudbo ama dego.

**Qofka la tahriibiyay:** Waxa loola jeedaa qof kasta oo muwaadin ah oo dhibbane ah oo uu ku dhacay falka tahriibintu iyadoo ay cadaatay in la khasbay ama la khiyaamay.

**Lacag madax furasho:** Waxa loola jeedaa lacagta ama hantida kale ee si khasab ah looga qaado qofka laga ganacsaday ama ehelkiisa ama saaxiibadiisa.

**Ogolaansho:** Waxa loola jeedaa in qofku uu rabitaankiisa heshiis ku galo ama wax ku aqbalo isagoo leh xorriyad, awood iyo sharciyad uu rabitaankaas ku sameeyo.

**Gaadiid:** Waxa loola jeedaa nooc kasta oo gaadiid ah sida baabuur, doon, markab, diyaarad ama nooc kasta oo gaadiid oo loo adeegsan karo daabulista tahriibeyaasha iyo dadka laga ganacsanayo.

**Carruur:** Waxa loola jeedaa qofkasta oo aan qaangaadhin ama ay da'diisu ka yar tahay 15 jir.

**Khasbid [baqo-gelin]:** Waxa loola jeedaa u adeegsiga cabsigelin (tahdiid) ama u adeegsiga awooddeed (awood-sheegasho) si qofkaasi ama qof kale loogu dhaliyo in uu si ka baxsan ikhtiyaarkiisa u qabto shaqo ama adeeg oo aanu ku dhaqaaqin fal.

**Khiyaamo: -** Waxa loola jeedaa:

i. In la abuuro ama la ayido faham been ah oo uu ka mid yahay midka la'xidhiidha sharciga, qiyamka ama xaaladda maskaxee.
ii. In laga hortaggo in qofka kale uu helo ogaal wax ka badeli kara maxsuulka dhacdo taagan.
iii. In qof uu ku guuldareysto in uu saxo faham been ah oo uu hore u abuuray ama ayiday.

**Baasaaboor ama aqoonsi been abuurka ah: -** Waxa loola jeedaa: Baasaaboor ama aqoonsi ay samaysay cidkasta oo aan ahayn qofkii ama hay'addii aan awoodda sharci u lahayn ama lagu helay hab khayaamo, musuqmaasuq ama sifo kasta oo kale oo sharci-darro ah oo uu adeegsaday qof aan ahayn qofkii sida saxda



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

ah u lahaa.

**Gelid Sharci-darro ah:** - waxa loola jeedaa ka soo gudbidda xuduudaha iyada oo aan loo hoggaansamin shuruuddaha lagama maarmaanka u ah in si sharci ah loo soo galo dalka Soomaaliland.

**Koox dambiileyaal abaabulan:** - Waxa loola jeedaa koox qaab-dhismeed leh oo ka kooban laba qof iyo wax ka badan una hawlgasha qaab habaysan ama isku xidhan ujeeddadooduna tahay in ay ku kacdo fal-dembiyeedyada xeerkan ku cad, si ay faa'iiddo maaliyaddeed iyo mid maadi ah ba si toos ah ama dadban ugu hesho;

**Dhaqannada la mid ah adoonsiga:-** waxa loola jeedaa ka faa'iiddeysiga dhaqaale ee qof kale laga faa'iiddeysto, kuna saleysan xidhiidh dhab ah oo ku tiirsnaansho ama khasab (cabsi-gelin) ah oo ay la socdaan in qofka si aad u ba'an looga qaado xuquuqaha madaniga ah ee aasaasiga ah, waxaana kamid ah: culeys deyneed, midiidin, guurka khasabka ama adoonsiga ah iyo ka faa'iideysiga carruurta iyo dhallaanka.

**Hantida dembiga laga dheefo:** - waxa loola jeeda hanti kasta oo si toos ah ama dadban looga helay gelitaanka fal-dembiyeed xeerkan ku cad.

**Adoonsi:** - Waxa loola jeedaa habdhaqan gurracan sida ku shaqaysi, midiidin, ka faa'iidaysi ku wajahan qof aan awood u lahayn in uu isdifaaco ama diido waxa laga dalabanayo xaaladaha dhaqaale, bulsho iyo sharci ee uu ku sugan yahay awgeed.

**Dalka qaabilay:** - Waxa loola jeedaa dalka qofka laga ganacsanayo ama la tahriibinayo lageeyay.

**Waddanka la dhex marayo:** Waxa loola jeedaa waddanka qofka la tahriibinayo ama laga ganacsanayo la keeno ama uu ku safrayo dhulka, badda, cirka ama uu si aan joogto ahayn u joogo isaga oo qayb ka ah falka kaganacsiga dadka ama tahriibinta.

**Tahriib:** - waa socdaal kasta oo sifo sharci daro ah qof kaga baxo ama ku soo galo xuduudaha dalka badd iyo berriba si uu halis u galiyo naftiisa ama nafo kale.

**Tahriibinta Dad Ajaanib ah:** - waxa loola jeedaa soo gelinta ama ka saarista xuduudaha dalka qof ajaanib ah si aan waafaqsanayn xeerka socdaalka (Xeer lr 72/95) si loo tahriibiyo;

## Qodobka 3aad
## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerkan waxa ka mid ah:

1) Ka hortagidda iyo la dagaalanka fal-danbiyeedyada ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka.
2) Xaqiijinta in si caddaalad ah oo hufan loo baadho isla markaana dacwad loogu oogo dadka ku kaca fal-dambiyeedyada ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka.
3) Ilaalinta iyo gargaaridda dhibbanayaasha laga ganacsaday iyo muhaajiriinta la tahriibiyo, iyada oo la ilaalinayo in si buuxda loo ixtiraamo xuquuqahooda aadamaha.
4) Kobcinta iyo fududeynta iskaashiga maxaliga ah iyo ka caalamiga ah ee la dagaalanka fal-dambiyeedyada ku xusan Xeerkan.

## Qodobka 4aad
## Xadka dabbaqaadda Xeerka

1) Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa baadhista, oogista iyo maxkamadaynta fal-danbiyeedyada kaganacsiga iyo tahriibinta dadka iyo falalka la'xidhiidha ee ka dhaca dhammaaan xuduudda dalka Jamhuuriyadda Somaliland la leeyahay dalalka kale.

2) Xeerkan waxa kale oo lagu dabbaqayaa:

   b) Haddii uu faldanbiyeedku ka dhacay dal kale balse uu ka bilaabmay dhulka Somaliland.

   t) Haddii uu faldanbiyeedku ka dhacay dal kale balse eedaysanayeeshu soo galeen gudaha Somaliland; ama ka gudbiyeen dad xudduudaha dhulka Somaliland.

## Qodobka 5aad
## Dabbaqaada ka baxsan xad-dhuleedka Somaliland

1) Iyadoo aan la xaddidayn qodobbada 7aad iyo 8aadee Xeerka Ciqaabta Guud, Xeerkan waxaa lagu dabbaqayaa fal-dembiyeed kasta oo ku xusan Xeerkan oo lagu galay meel ka baxsan xad-dhuleedka Soomaaliland marka uu:

b) Qofka fal-dembiyeedka geystay uu yahay muwaadin Soomaaliland u dhashay.
t) Qofka fal-dembiyeedka loo geystay yahay muwaadin Soomaaliland u dhashay.
j) Qofka fal-dembiyeedka ku kacay yahay qof haystay degennaansho in uu ku nolaado Soomaaliland gudaheeda wakhtiga uu fal-dembiyeedka ku kacay.

## QAYBTA 2AAD
## DANBIYADA KAGANACSIGA IYO TAHRIIBINTA DADKA

## Qodobka 6aad
## Danbiyada Kaganacsiga Dadka

1) Qof kasta oo abaabula, safriya, daabula, guri ugu haya qof kale isaga oo adeegsanaya qaab cabsi-galin, tahdiid ama hanjabaad ah oo xoog u adeegsada ama qaabab kale oo baqo gelin (khasab) ah, qofaalasho, dagid, khiyaamo, ama ku tagrifal awoodeed, ama ka faa'iidaysta xaaladda nugayl ee qofka oo ku bixiya ama ku qaata lacag ama faa'iiddo kale, isaga oo ujeeddadiisu tahay dhiig-miirasho iyo ku macaashidda qofka (ku ganacsi): kuwaas oo ay ka mid yihiin ku ganacsiga jidhka qofka (exploitation of the prostitutuion of others), ku shaqaysi khasab ah (forced labour) adoonsi (slavery) ama falalka la midka ah ama kala bixidda xubno jidhkiisa ka mid ah (removal of organs) ama lacag madax-furasho ah ku qasba inuu bixiyo waxa uu galay fal-danbiyeed ka ganacsi dad.
2) Abaabulka, safrinta, daabulista ama guri ugu haynta loo gaysto qof carruur ah ama aan lahayn awoodda garashada ama doonnidda ee loola jeedo dhiig-miirasho iyo kushaqaysi, waxa loo qaadanayaa in ay tahay fal-dambiyeed kaganacsi dad, xataa haddii aan loo adeegsan qaababka xoogga ama cabsi gelinta ah ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan.
3) Qof kasta oo lagu helo danbiyada ku xusan faqradda 1aad iyo 2aad ee qodobkan, waxa lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 5 sanno ilaa 20 sanno oo xadhig ah.
4) Ogolaanshaha dhibaneyaasha fal-danbiyeedyada ku xusan faqradda 1aad iyo 2aad ma yeelanayaan saamayn sharci oo cudurdaar u noqda eedaysanaha.

## Qodobka 7aad
## Gacan siinta ama Gargaaridda Kaganacsiga Dadka

1) Qof kasta oo gacan ka gaysta fal-danbiyeedka ka gancsiga dadka isaga oo og
Kuna kaca falalkan: -
B. U ogolaada gurigiisa in lagu hayo ama loo isticmaalo ka ganacsiga dadka ama;
T. Udiyaariya gaadiid, ama jidmariya ama u fududeeya daabulida dadka dhibanaha ah ee dhinaca dhulka, badda, ama cirka; ama
J. Daabaca, xayaysiiya, faafiya; ama si kale u dhiirigaliya ka ganacsiga dadka isaga oo adeegsanaya Af ahaan, qoraalo daabacan ama aaladda internetka ama hab kale oo isgaadhsiinta elektarooniga ah, ama
X. Maamula, fura; ama maalgaliya xarun u taagan ujeeddooyinka ka ganacsiga dadka; ama



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

Kh. Ka caawiya ama usoo saara ama u sameeeya aqoonsi ama waraaqaha socdaalka oo been abuura ama ka caawiya helitaanka waraaqahasi si sharci darro ah si qof kale faaiido uga helo.

2) Qof kasta oo lagu helo faldambiyeeydya ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxa lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 2 sanno ilaa 10 sanno oo xadhig ah
3) Qofka ajaanibka ah ee dembigan lagu helo, waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan farqadda 2 aad ee qodobkan iyo ganaax lacageed oo dhan $10,000 (Tobban Kun oo Dollarka Maraykanka ah)

## Qodobka 8aad

## Xaaladaha Gaarka ah ee Culaysinta Ciqaabta

1) Maxkamaddu waxay awood u leedahay in ay kordhiso ciqaabta ku xusan qodobka 6aad iyo 7aad ee Xeerkan saddex meelood meel ahaan:

b) Haddii fal-dambiyeedka loo adeegsaday xoog, maandooriye ama hub.
t) Haddii dhibbanaha fal-dembiyeedku yahay qof carruur ah, qof haween ah ama qof nugul.
j) Haddii fal-dembiyeedka ay ka dhashaan dhaawac ku keena dhibbanaha waxyeelo maskaxeed ama jidheed.

x) Haddii fal-dembiyeedka ay fuliyeen koox dembilayaal abaabulan ah.

Kh) Haddii fal-dembiyeedku ku dhacay in ka badan hal dhibbane.
d) Haddii qofka falka geystay uu hore ugu dhacay xukun ciqaab oo isla fal-dembiyeedkan ah ama mid lamid ah.
r) Haddii fal-dembiyeedka uu ku kacay sarkaal ama shaqaale dawladeed oo ku tagrifalay awoodiisa.

S) Haddii qofka falka ku kacay uu dhibbanaha ku lahaa meeqaam masuuliyadeed ama aaminaadeed.

2) Xaaladaha culaysinta ama kordhinta ciqaabta waxa loo raacayaa mabaadii'da ku xusan qodobka 75aad ee Xeerka Ciqaabta Guud.

## Qodobka 9aad

## Danbiyada Tahriibinta Dadka

1) Qof kasta oo si ula kac ah, si uu u helo ama cid kale u hesho si toos ah ama si dadban faa'iido maaliyeed ama ka dhigta shaqo si uu qof ama tahriibayaal u soo galiyo ama uga gudbiyo xuduudaha Somaliland si xadgudub ku ah xeerka socdaalka, waxa uu galay fal-danbiyeed.
2) Qof kasta oo lagu helo danbiga ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxa lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 2 sanno ilaa 10 sanno oo xadhig ah

## Qodobka 10aad

## Xaaladaha Gaarka ah ee Culaysinta Ciqaabta

1) Maxkamaddu waxay awood u leedahay in ay kordhiso ciqaabta ku xusan qodobka 9aad ee Xeerkan saddex meelood meel ahaan:

b) Haddii qofka dembiga ku kacay uu ku lug leeyahay fal ujeeddadiisu tahay bixinta, qaybinta, soo saaridda, iibinta, siinta, haysashada dhukumenti aqoonsi ama socdaal oo been abuur ah.
t) Haddii fal-dembiyeedku uu khuseeyo xaalado khatar geliyey ama ay gelin karaysay nolosha iyo ammaanka qofka la tahriibinayey.
j) Haddii Fal-dembiyeedka loo galay si naxariis la'aan ah ama bahdilaad ah oo loo dhaqmay qaab Bini-aadamnimada ka baxsan oo ay ku jirto ka faa'iideysiga dadka la tahriibiyey.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

x) Haddii qofka la tahriibinayay yahay ilmo carruur ah, gabadh uur leh ama qof nugul.

kh) Haddii Qofka dembiga ku kacay uu ka faa'iiddeystay nuglaanshaha qofka.
d) Haddii qofka danbiga ku kacay uu hore u galay isla fal-dembiyeedkan.
r) Haddii qofka fal-dembiyeedka galay uu qayb ka ahaa hawl ay fulinaysay koox dembiileyaal abaabulan ahi.

s) Haddii qofka dembiga galay u adeegsaday daroogo, daawo ama hub.
sh) Haddii fal-dembiyeedku la'xidhiidho tiro aad u badan oo tahriibeyaal ah ama haddii danbiga si baahsan loo sameeyay.
dh) Qofka dembiga ku kacay uu wakhtigaas ahaa sarkaal dawladdeed.
c) Haddii danbiga ay la socdeen xaaladdo khatar galiyay ama ay suurtagal ahayd in ay khatar galiyaan nolosha ama badbaadada qofka la tahriibinayay.

2) Maxakamaddu waxay kordhinaysaa ama hoos u dhigaysaa xukunka ciqaabta ah marka ay qiimayso xaaladaha ama duruufaha dembiga lagu galay ee cusleeya ama khafiifiya si waafaqsan qodobka 75aad ee Xeerka Ciqaabta Guud.

### Qodobka 11aad
### Caawinta iyo Gacan siinta Tahriibinta Dadka

1) Qof kasta oo og ama ay ahayd in uu ogaado, si uu faa'iido dhaqaale, faa'iido kale oo toos ah ama dadban uga helo, gacan ka gaysta, u fududeeya, caawiya, haga ama jid mariya tahriibayaal, si loo soo galiyo dhulka Somaliland ama looga gudbiyo xuduudaha dalka Somaliland, iyada oo ujeeddadu tahay fudaydinta falka tahriibinta dadka, waxa lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 6 bilood ilaa 5 sanno oo xadhig ah.

## QAYBTA 3AAD
## DANBIYADA LA'XIDHIIDHA KAGANACSIGA IYO TAHRIIBINTA DADKA

### Qodobka 12aad
### Danbiyada Wadaha Gaadiidka Tahriibeyaasha

Qof kasta oo si uu uga helo faa'iidooyin dhaqaale, faa'iidooyin kale oo toos ah ama dadban ugu qaada gaadiid tahriibeyaal, waxa uu galay danbi, waxaana lagu ciqaabayaa marka danbiga lagu helo xabsi u dhaxeeya 2 sanno ilaa 10 sanno oo xadhig.

### Qodobka 13aad
### Danbiyada La'Xidhiidha Baasaaboorrada iyo Aqoonsiyada

1) Qof kasta oo si ula kac ah uga been sheega xog si uu u fududeeyo qaadashada aqoonsi, Baasaaboor ama si khiyaamo ah uga qaata laamaha dawladda ee ku shaqada leh, isaga oo ujee ddadiisu tahay in uu ku fududeeyo ama lagu sameeyo fal-dambiyeedyada kaganacsiga iyo tahtiibinta dadka, waxa uu galay danbi, waxaana lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 2sanno ilaa 10 sanno oo xadhig ah.
2) Qof kasta oo si ula kac ah, si uu uga helo faa'iido dhaqaale ama faa'iidooyin kale oo toos ah ama dadban, u sameeya, u been-abuura, u soo saara, u bixiya, u iibiya, ama kala shaqeeya cid kale in ay si sharci-darro ah u samayso Baasaaboor, aqoonsi ama ka been sheega xogta qof kale si uu u fududeeyo qaadashada Baasaaboor ama aqoonsi, iyada oo ujeeddadiisu tahay in loo adeegsado gelista fal-dembiyeedyada kaganacsiga iyo tahriibinta dadka ee ku xusan qodobbada 6aad iyo 9aad ee xeerkan waxa uu galay danbi, waxaana lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 2 sanno ilaa 10 sanno.
3) Ciqaabta waxa lala akhrinayayaa qodobka 37-aad ee Xeerka Socdaalka Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr. 72/1995 iyo qodobbada ciqaabta ah ee Xeerka Ciqaabta Guud.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 14aad

## Adeegyada Maaliyadeed ee La'xidhiidha Fal-danbiyeedyada Xeerkan

1) Qof kasta, ama shaqaale kasta oo xawaaladeed oo si toos ah ama si dadban u bixiya adeegyo maaliyadeed ama xawila lacag.
   b. Isaga oo og ama haya sababo macquul ah oo lagu rumaysan karo in loo adeegsanayo gabi ahaan ama qayb ahaan fal ujeedadiisu tahay in loo xawilo tahriibiyayaasha si madaxfurasho ama loogu fududaynayo qof kasta oo ku kacay faldambiyeedka ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka.
   t. Isaga oo og ama haya sababo macquul ah oo lagu ogaan karo in adeegaasi loo isticmaalayo ama loogu faa'iidaynayo qof si uun ugu lug leh arrimaha kaganacsiga iyo tahriibinta dadka.
2) Qofkaasi wuxuu galay dambi waxana marka danbiga lagu helo lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 1 sanno ilaa 10 sanno, ganaaxyada iyo ciqaabta shakhsiyaadka iyo Shirkadahana waxa loo raacayaa Qodobbada 22aad iyo 23aad ee Xeerka Xawaaladaha Somaliland Xeer Lr. 86/2019

## Qodobka 15aad

## Dhaawaca iyo dhimashada Dhibbanaha

1. Dhaawacyada soo gaadha dhibbanaha waxa la waafajinayaa sida ay qabto shareecada Islaamku oo ah in la xaqo qofka dhaawacu soo gaadhay iyo qodobka 440 ee XCG qaybihiisa kala duwan ee la'xidhiidha dhaawacyada haddii uu fudud yahay ama uu culus yahay.
2. Haddiise uu falkaasi sababo dhimasho waxa loo raacayaa axkaamka shareecada Islaamku u dhigtay.

## Qodobka 16aad

## La wareegidda Hantida Fal-danbiyeedka

1) Marka laga yimaaddo ciqaab kasta oo lagu sheegay xeerkan iyo xeer kale gudahiisa, Maxkamaddu waxa ay awood u leedahay in ay amarto in lala wareego dhammaan hantida iyo faa'iidooyinka laga dheefo fal-danbiyeedyada ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka.
2) Iyada oo aan waxba loo dhimmayn nuxurka faqradda 1aad ee qodobkan, Maxkamaddu waxa kale oo ay amri kartaa in lala wareego wixii hanti ah ee loo adeegsaday fududaynta danbiyada xeerkan ku xusan si waafaqsan Xeeka Ciqaabta Guud.
3) Faa'iidooyinka iyo hantida loola wareegay si waafaqsan faqradaha qodobkan, waxa lagu bixinayaa magdhawga dhibbanaha, haddii ay ku filnaan weydana hantida gaarka ah ee eedaysanaha ayaa laga bixinayaa marka uu danbigu ku caddaado.
4) Haddii faa'iidooyinka laga dheefay ama lagu galay danbiga la burburiyo, la qiimo tiro ama si kale qofka danbiga ku kacay uga dhigo wax aan qiimo lahayn, la qariyo ama cid kale lagu wareejiyo si looga hortago in la helo ama lagala baxsado la wareegista, qofka danbiilaha ah waxa lagu xukumayaa in uu bixiyo xaddi lacageed u dhigma qiimaha hantida iyo faa'iidooyinka uu ka helay fal-danbiyeedka.

## Qodobka 17aad

## Burburinta iyo Is hortaagga Caddaymaha

Qof kasta oo burburiya, qariya caddaymo ama laaluusha, u hanjaba qof kale si uu u burburiyo ama u qariyo caddaymo la'xidhiidha fal-danbiyeedyada ku xusan xeerkan, waxa uu galay danbi waxaana lagu ciqaabayaa xabsi dhan 1 sanno ilaa 5 sannadood



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qododbka 18^aad^

## Ka baaqsashada Sheegista Xogta

1) Qof kasta oo hela xog ama caddayn ku saabsan fal-danbiyeedyada ku xusan xeerkan oo ka baaqsada ama ku guuldarraysta in uu si dhakhso ah ugu soo wargeliyo Booliska ama hay'adda kale ee awoodda u leh, iyada oo aanay jirin sabab macquul ah oo u diidaysaa in uu sidaa sameeyo, waxa uu galay danbi waxaana lagu ciqaabayaa 6 bilood ilaa 2 sanno oo xadhig ah.
2) Waxa dawlada ku waajib ah inay abaal-marin siiso qof kasta oo keena xog, taasi oo ka hortagaysa tahriibinta dadka ama caawiya in la helo tahriibiyayaal.

## Qododbka 19^aad^

## Danbiga ay Gasho Hay'ad Shakhsiyad Qaanuuni ah lihi

1) Haddii ay hay'addi dambi gasho, maadama oo ay leedahay marka la diiwaan geliyo shakhsiyad qaannuuni ah waa in la raaciyaa ciqaabo iyo ganaax iyada oo loo raacayo hannaanka xeerka Shirkadaha Somaliland Xeer Lr. 80/2018.
   B. Shaqo ka joojin muddo ah
   J. Liisanka oo gabi ahaanba laga laalo.
2) Qofka shirkadda ka masuulka ah ee ku gala fal xeerkan ku liddi ah ha ahaado maamule,"CEO" ama Agaasime "Director"ama xubin ka tirsan hoggaanka sare ee shirkadda "Bod Member" ama shaqaale shirkadda ah "staff" waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan 1 sanno illaa 7 sanno.

# QAYBTA 4AAD
# CAAWINTA IYO MAGDHAWGA DHIBBANAHA LA SIIYO

## Qododbka 20^aad^

## Dambi La'aanta Dhibbanaha

1) Dhibbane kasta oo muwaadin ah uu ku dhacay dambiga kaganacsiga dadka ama tahriibintu loo raaci maayo wax dambi ah oo la'xidhiidha in uu dhibbane u noqday danbiyada ku xusan xeerkan.
2) Dhammaan marxaladaha caddayn urrurinta, baadhista ama dacwadda fal-danbiyeedyada xeerkan ku xusan, waxa lagu dedaalayaa in la ogaado dhibbaneyaasha iyo in la go'aamiyo cidda ay yihiin, waddamada ay u dhasheen iyo da'dooda si loo xaqiijiyo in laga soo kaxeeyay danbiileyaashii haystay.
3) Cidkasta oo dalka ku soo gashay Kaganacsiga iyo Tahriibinta Dadka ama iskii tahriib ku soo galay dalka, waxaa dib lagu Celina yaa dalkii uu kayimid.
4) Wasaarada Arrimaha Gudaha, Hayaddaha Nabadgelyada iyo Ciidanka laanta Socdaalka waxaa waajibka saran yahay in ay ka raafaan dalka cidkasta oo aan sifo sharci ku joogin dalka Somaliland.

## Qododbka 21^aad^

## Magdhawga iyo Cawil-celinta

1. Magdhawga iyo cawil-celinta dhibbanuhu waa xuquuq aasaasi ah oo uu ku leeyahay eedaysanaha in looga xukumo, waana in uu codsigiisa magdhawga u soo gudbiyaa maxakamadda oo uu ka dalbanayo khasaarihii ka soo gaadhay dembiga uu u gaystay eedaysanuhu si waafaqsan qodobka 14^aad^ faqraddiisa 2^aad^ ee XHC.
2. Arjiga codsiga ah ee ku xusan faqradda hore waxa loo gudbinayaa maxakamadda qaab qoraal ah, ka hor inta aan la gebogebayn dacwadda ciqaabta ah ee socota marxaladda ku xusan qodobka 119aad ee XHC, si waafaqsan qodobka 14^aad^ faqraddiisa 3^aad^ ee XHC.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. Maxakamadda ayaa awood u leh ka go'aan gaadhista iyo cayimaadda xadka magdhaw ee la siinayo dhibbanaha marka la qiimeeyo xaaladdiisa nololeed.

Waxa uu garsooruhu magdhawga u raaci karaa si waafaqsan xeerka Madaniga qodobkiisa 161^aad^.

## Qodobka 22^aad^
## Taakuleynta Dhibbaneyaasha

1) Hay'adaha awoodda u leh ee Somaaliland waxay dajinayaan qorsheyaal ku saabsan daryeelka dhibbaneyaasha danbiyada xeerkan ku xusan, sida:

b) In lagu soo celiyo dalka Somaliland ama laga kaxeeyo Somaliland oo dalalkoodii lagu celiyo.

t) In la siiyo daryeelka iyo daaweynta caafimaad ee lagama maarmaanka ah, haddii ay habboon tahay oo ay kamid tahay, baadhis ikhtiyaari ah oo bilaash ah oo si qarsoon oo xafidan looga baadhayo xanuunka HIV-ga iyo xanuunada kale ee galmada layskugu gudbiyo.
j) In la siiyo gargaarka la talin nafsi ah oo lagu siiyo luuqad uu qofku fahmi karo oo ah si qarsoon oo xafidan oo la ixtiraamayo arrimaha u gaarka ah qofka ay khusayso.
x) In la siiyo macluumaadka la'xidhiidha kaalmada sharci ee wakiil lagaga noqonayo dantiisa inta lagu jiro baadhista dembiga oo ay kamid yihiin helitaanka magdhow iyo haddii ay suurtogal tahay, in laga caawiyo codsiga ee meeqaamka socdaalka caadiga ah.
kh) Wixii kale ee kaalmo/caawin ah ee ay dhibbaneyaashu u baahdaan.

2) Marka ay dajinayaan qorsheyaasha ku xusan faqradda 1aad, hay'adaha awoodda u lihi waxay tixgalinayaan da'da, jinsiga iyo baahiyaha gaarka ah ee carruurta iyo dadka laxaadka la' iyo duruufaha gaarka ah ee qof kasta oo dhibbane ah, si loo illaaliyo xuquuqahooda bini-aadminimo loona dhawro sharafta aadanaha.
3) Iyada oo aan waxba loo dhimmayn qodobbada xeerarka kale ee jira, dhibbaneyaasha waxa loo ogolaanayaa in ay Somaliland sii joogaan inta dacwaddooda sharci la soo gebogebaynaayo.
4) Qof kasta oo ajaanib ahi waxa uu la siman yahay xuquuqaha ay leeyihiin muwaadiniintu marka laga reebo xaqa siyaasiga ah si waafaqsan qodobka 8^aad^ faqraddiisa 3^aad^ ee Dastuurku u gaar yeelay muwadiniinta.
5) Waxa dawladda waajib ku ah si waafaqsan qodobka 15^aad^ ee Xeerka Habka Ciqaabta in loo qabto turjumaan ka kaalmeeya dacwaddiisa iyo arrimihiisa gaarka ah.

## Qodobka 23^aad^
## Dib-u-celinta Dhibbaneyaasha Ajaanibka ah

1) Qof kasta kasta oo ajaanib ah isla markaana ah dhibane oo uu ku dhacay falka tahriibintu ama uu yahay ilmo yar ama qof waalan loo raaci maayo wax dambi ah oo la'xidhiidha in uu dhibbane u noqday danbiyada ku xusan xeerkan. Marka laga reebo wixii ku xadgudub ah ee uu ka galay Xeerka Socdaalka (Xeer lr 72/1995).
2) Iyada oo aan waxba loo dhimmayn qodobbada xeerarka kale ee ku saabsan dal ku galka, baasaaboorrada iyo xaaladdaha kale, marka dhibbane dal kale u dhashay la aqoonsado isaga oo ku sugan Somaliland, Laanta Socdaalka oo kaashanaysa hay'adaha ay khusayso iyo hay'addaha caalamiga ah, waxa ay dhibbanaha ku celinaysaa waddankii uu u dhashay.
3) Marka muwaadin shisheeye loo aqoonsado in uu yahay marag muhiim ah ama haddii uu isagu doonayo in uu marag u furo, si waafaqsan xeerarka ay khusayso ayaa loo siinayaa degennaansho kumeel-gaadh



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA ◆ FAAFINTA RASMIGA AH ◆ OFFICIAL GAZETTE ◆ SOLICITOR GENERAL OFFICE

ah ilaa inta dacwadda maxkamadda laga gebogebaynayo, xuquuqdiisa bini-aadminimana waa la xushmaynayaa.

## Qodobka 24^aad

## Dib u soo Celinta Dhibbanayaasha u dhashay Somaliland

1) Hay'addaha awoodda u leh waa in ay fududeeyaan isla markaana ogolaadaan soo noqoshada dhibbanayaasha fal-dambiyeedyada xeerkan ee u dhashay Somaliland si aanu ku jirin dib-u-dhac aan macquul ahayn iyada oo la tixgelinayo xuquuqahiisa iyo ammaankiisa.
2) Haddii dhibbanahu aanu haysan dhukumentiyadii loo baahnaa isla markaana ay hay'addaha awoodda u leh ee dalka qofka lagaga ganacsanayey codsadaan, hay'adda awoodda u leh waxay siinaysaa dhukumentiyadan loo baahan yahay ama ogolaanshaha kale ee lagama maarmaanka u ah in qofkaasi uu awood u yeesho in uu dib u soo galo Somaliland.
3) Wasaarada Arrimaha Dibeddu iyada oo adeegsanaysa hay'adaha amaanka iyo hay'adaha caalamiga ah, waa inay ka hawl-gashaa in si dhakhso ah loo soo daayo, qof kasta oo reer Somaliland ah oo loo haysto tahriib.

## Qodobka 25^aad

## Macluumaadka Dhibaneyaasha

1) Dhammaan xogta shakhsiga ah ee la'xidhiidha dhibbaneyaasha ka ganacsiga dadka waa in loo isticmaalaa si gaar u ah ujeeddooyinka markii hore loo soo urursaday.
2) Hay'adda awoodda u leh waxay soo saaraysaa hab (protocol) laysku weydaarsado macluumaadka ka dhaxeeya hay'adaha ay khusayso aqoonsashada iyo gargaarka dhibbanaha iyo baadhista dembiyada iyada oo si buuxda loo ixtiraamayo ilaalinta arrimaha shakhsiga ah iyo amniga dhibannayaasha.
3) Natiijooyinka baadhista caafimaad ee dhibbanaha kaganacsiga dadka waa in loogu dhaqmaa si qarsoon oo xafidan waxaana loo adeegsanayaa ujeeddada baadhista dembiga iyo dacwad oogidda oo keliya.
4) Ku xadgudubka faqradda 3^aad ee qodobkan waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan 10,000,000 Shillinka Somaliland.
5) Hay'adda awoodda u leh waa inay siisaa dhibbaneyaasha macluumaadka nooca daryeelka, gargaarka iyo ilaalinta ay xaqa u leeyihiin iyo suurtogalnimada daryeelka iyo gargaarka ay bixinayaan ururrada aan dawliga ahayn iyo hay'addaha dhibbannayaasha taakuleeya iyo sidoo kale macluumaadka wixii dacwad ah ee la'xidhiidha.
6) Macluumaadka waxaa lagu siinayaa luuqad uu dhibbanahu fahmayo.
   Haddii dhibbanahu aanu wax akhriyi karayn, waa in uu uga warramaa masuul awood u lehi.
7) Dhibbaneyaasha waxa lala xidhiidhsiinayaa eheladooda iyo safaarahooda ugu dhaw, marka ay yihiin dal shisheeye

## Qodobka 26^aad

## Ilaalinta Guud ee Dhibbaneyaasha iyo Markhaatiyada

1) Hay'adaha awoodda u leh waa in ay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagu xaqiijinayo in dhibbaneyaasha iyo markhaatiyada iyo qoysaskooda, la siiyey ilaalin ku filan haddii amnigoodu uu khatar ku jiro oo ay kamid yihiin tallaabooyinka lagaga ilaalinayo cadaadiska iyo aargoosiga.
2) Dhibbannayaasha iyo markhaatiyadu waa in ay helaan barnaamij iyo tallaabo kasta oo jirta oo lagu ilaaliyo markhaatiyada.
3) Marka ay lagama maarmaan u tahay sugidda ammaanka dhibbanaha ama markhaatiga, hay'adaha awoodda u leh marka uu ka codsado dhibbanahu ama iyagoo la tashanaya isaga/iyada waxay qaadi karaan dhammaan talaabooyinka lagama maarmaanka u ah aag baddelka dhibbannaha iyo xaddidaadda sheegidda magaciisa, cinwaankiisa iyo macluumaadka kale ee qofka lagu aqoonsan karo ilaa xad inta ay macquulka tahay.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 27aad

## Dhibbaneyaasha iyo Markhaatiyada Carruurta Ah

1) Marka laga yimaaddo dhammaan dammaanad qaadyada kale ee Xeerkani uu bixinayo:
   b. Dhibbaneyaasha carruurta ah, gaar ahaan kuwa markaas uun dhashay, waa in taxadar iyo feejignaan gaar ah loo yeeshaa.
   t. Marka aan la hubin da'da dhibbanaha isla markaana ay jiraan sababo lagu aamini karo in dhibbanahu uu carruur yahay, waxaa laga soo qaadayaa in uu carruur yahay waana in sidaas loola dhaqmaa, iyada oo ay soconayso xaqiijinta da'diisu.
   j. Haddii dhibbanahu yahay qof da'yar oo aan la wehelin hay'addaha awoodda u leh waxay:
      i. Magacaabayaan masuul sharci oo wakiil uga noqda ilmaha dannahiisa.
      ii. Qaadayaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah ogaanshaha aqoonsigiisa iyo dhalashadiisa.
      iii. Deddaal ka samaynayaan in ay ogaadaan qoyskiisa marka ay dani ku jirto ilmaha dannahiisa ugu fiican.
2) Dhammaan wixii la'xidhiidha maamulka caddaaladda iyo wakiil u samaynta carruurta, khilaafka xagga da'da iyo ciqaabta ilmaha dembi gala waxa loo raacayaa si waafaqsan Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta Somaliland Xeer Lr. 36/2007".

## QAYBTA 5AAD
## QODOBO KALA DUWAN
## Qodobka 28aad

## Muddada Oogista Danbiyada Kaganacsiga iyo Tahriibinta Dadka

Danbiyada kaganacsiga dadka iyo tahriibinta dadka ee lagu sheegay xeerkan waxa loo tixgalinayaa in ay yihiin danbiyo ka dhan ah xuquuqda Aadamaha oogistooduna malaha muddo dhaaf si waafaqsan qodobka 24aad faqraddiisa 1aad, 2aad, 3aad, 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

## Qodobka 29aad

## Xuquuqda eedaysanaha/eedaysanayaasha.

Eedaysane kasta /eedaysanayaal lagu tuhmay fal xadgudub ku ah xeerkan waxa uu xaq u leeyahay haddii uu ajaanib yahay iyo haddii uu muwaadiin yahayba xuquuqaha uu Dastuurka qodobkiisa 27aad siiyay eedaysanayaasha:

b) Qofka xorriyadda laga qaaday waxa uu xaq u leeyahay in uu la kulmo qareenkiisa iyo qaraabadiisa iyo ciddii kale ee uu codsado.

t) Waa in maxakamad lagu horgeeyaa 48 saacadood laga bilaabo marka la qabtay.

j) Waxa reebban in qofka lagu dirqiyo qirasho dembi, marag furid ama dhaar mid kasta, qofka lagu qasbaana wax ka soo qaad ma leh.

x) Waxa reebban in qofka lagu xidho meel aanu xeerku bannayn.

Kh) Mar kasta oo xadhiggiisa la cusboonaysiinayo waa in la ogaysiiyaa cidda uu doorto.

d) Eedaysane kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu qabsado qareen difaaca ama qareenno.

r) Haddii aanu eedaysanuhu awoodi karrin in uu qabsado qareen difaaca, dawladda waxa ku waajib ah inay u qabato qareen (qareenno difaac).



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

s) Eedaysanahu haddii aanu fahmayn luuqadda waddanka waxa uu xaq u leeyahay in loo qabto turjumaan ka caawiya fahanka dacwadda iyo marxaladaha kiiskiisa.

Sh) Eedaysanaha uu xukun kaga dhaco kiiskan waxa uu xaq u leeyahay in uu racfaan ka qaato.

## Qodobka 30$^{aad}$

## Hagayaal iyo xeer-nidaamiyayaal

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guddaha waxa uu awood u leeyahay marka uu dhaqan-galo xeerkani in uu soo saaro xeer-nidaamiyayaal waafaqsan xeerkan isla markaana aan ka hor imanayn Dastuurka, kaas oo lagu dhaqan-galinayo ama lagu fulinayo xeerkan.

## Qodobka 31$^{aad}$

## Tafsiir

1) Xeerkan waxa loo fasirayaa si waafaqsan mucaahadooyinka caalamiga ah ee xuquuqul insaanka ee uu waajibiyay qodobka 21aad faqraddiisa 2aad ee Dastuurka JSL ee aan ka horimanayn shareecada islaamka.
2) Qodobada la'xidhiidha xuquuqda iyo xorriyaadka aasaasiga ah waxa loo fasirayaa si waafaqsan bayaannada caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha iyo xeerarka caalamiga ah ee ku xusan Dastuurka iyo xeerkan si waafaqsan shareecada islaamka.

## Qodobka 32$^{aad}$

## Nasakhaad

1) Xeerkani meesha kama saaraayo mabaadi'dda guud ee xeerka ciqaabta guud ee ku xusan buuga kowaad ee xeerka ciqaabta guud, kuwaas oo la socon karaaya xeerkan. Mabaadii'ddaasi guudna waa la dabaqayaa, haddii aanay si cad uga hor imanayn qodob amaba qodobo ka mid ah xeerkan.
2) Haddii uu qodob ama qodobo kamid ah xeerkani iyo xeerka ciqaabta guud amaba xeerarka kale ee dhaqangalka ah ee dalku iska hor yimaadaan, waxaa mudnaanta yeelanaaya qodobada ama qodobka xeerkan.
3) Xeer ciqaabeedkan gaarka ah waxa lagu nasakhay qodobbadda 433$^{aad}$, 455$^{aad}$, 456$^{aad}$, 457$^{aad}$, 458$^{aad}$, 459$^{aa}$d iyo 433$^{aad}$ ee Xeerka Ciqaabta Guud, kuwaasiyoo la xidhiidha dambiyada lidka ku ah bina-aadantinimada.
4) Sidoo kale waxa xeerkan lagu nasakhay wareegtadii Madaxweynaha ee summaddeedu tahay JSL/M/WWOD/232/_3046/02210 kuna taariikhaysan 23/02/2010.
5) Sidoo kale waxa uu xeerkani nasakhay wareegto maamul Madaxweyne summaddeedu tahay 001/02210 kuna taariikhaysan 16/06/13 iyo go'aan kasta oo maamul ama xeer-nidaamiye khilaafsan xeerkan gaarka ah.

## Qodobka 33$^{aad}$

## Kaabis iyo Wax-ka-beddel

Kaabis iyo wax-ka-beddel ayaa lagu samayn karaa qodobbada xeerkan mar kasta oo loo baahdo iyada oo la raacayo hab-raacayada caadiga ah ee loo maro kaabista iyo wax-ka-beddelka xeerarka dalka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 34[aad]
## Dhaqan-galka

Xeerkani waxa uu dhaqan-galayaa marka Baarlamaanku (Guurtida iyo Wakiillada) ay ansixiyaan, Madaxweynuhuna saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL

Md. C/risaaq Khaliif Axmed
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL